

Liiska Hubinta Booqashada Neefta ee ilmaha iyo Qoyska

Xakamaynta Neefta:

- Sidee ayaa neefta ilmaha loo xakameeyey sannad dugsiyeedkii hore?
 - Ilmuhu miyuu lahaa astaamaha neefta oo ka sii dartay ama neef qabatay?
 - Cunugu miyuu u seegay dugsiga neefta darteed?
- Ciyaarta cunuga miyay u xadidantay neefta darteed?
- Maxaa kiciya neefta cunuga?
- Miyaa laga helaa dugsiga waxyaaba kiciya oo siina xumeeyo neefta ilmaha?

Daawooyinka Neefta ee Dugsiga Laga helo:

- Ilmuhu miyuu haystaa dawo samatabbixin ah oo laga siiyo dugsiga?
 - Cunugu ma u baahan yahay in uu dugsiga ku haysto spacer (qalabka lagu xidho qalabka neefta) si uu ugu isticmaalo qalabkooda neefta?
 - Ilmuhu ma u baahan yahay xanuun baabi'iye ka hor waxbarashada jimicsiga ama fasalka jiiimka? Hadday haa tahay, waa kee?
- Ma caawin lahayd in ilmuhu u qaato qalabkooda neefta maalinlaha ah ("daawooyinka xakamaynta") dugsiga?
- Ilmuhu ma qaadi karaa oo ma isticmaali karaa qalabkooda samatabbixinta?
- Ilmuhu ma ku qanacsan yahay isticmaalka qalabkooda neefta (oo leh spacer haddii loo baahdo)?

Qorshaha Wax ka qabashada Neefta:

- Ilmuhu ma ka haystaa Qorshaha Wax ka qabashada Neefta bixiyehooda daryeelka neefta ama dhakhtarka guriga iyo dugsiga?
- Ilmaha iyo qoysku ma yaqaaniin sida loo isticmaalo qorshaha wax ka qabashada neefta si ay u caawiyaan marka ilmuhu qabo astaamaha neefta?

Foomamka iyo Xiriirada:

- Miyaad siisay kalkaalisada dugsiga magaca daryeel bixiyaha neefta ee ilmaha iyo lambarka taleefanka iyo cinwaanka xaruntooda caafimaad?
- Miyaad siisay dugsiga foomamka soo socda:
 - Nuqul ka mid ah Qorshe Hawleedka Neefta ee ilmaha
 - Amarka ka soo baxa rugta caafimaadka ilmaha ee ah in lagu siiyo daawooyinka neefta dugsiga.
 - Amarka ka soo baxa rugta ilmaha si uu asaga u wato una isticmaalo qalabkooda neefsashada ee samatabixinta
 - Ogolaansho xog wadaagis saxiixan si ay kalkaalisada dugsigu ula hadasho rugta caafimaadka ilmaha